

# Waa Maxay Sababata Waqooyiga Virginia Udaryeesho Tirakoobka 10-sano kasta laqabto ee 2020.

**LOUDOUN:** \*15,594 Degmada Loudoun ardayda waxay cunno ka heleen Barnamijka Nafaqada ee Dugsiga Guud oo ku saleysan xogta tirakoobka.

**PRINCE WILLIAM:** \*Maalgalinta ay qoondeysay Tirakoobka toban-sano kasta laqabto ayaa bixisay kaalmo kiro in ka badan 2,000 oo qoys.

Maalgalinta federaalka ee ku saleysan tirakoobka toban-sano oo kasta la qabto ayaa waxaa uu saameeynaya barnamijyada sida kuwa hoose. Istaatistikada ayaa waxa ay tusaysaa xogta miisaaniyada sanadka ee 2018.



**FAIRFAX:** \*Miisaaniyadaha dowladda fereraalka ayaa ka caawiyay 1,060 unug oo guryaha loogu talagalay dadweynaha loo beddelo kaalmooyinka guryahe ee Section 8-ka..

**ARLINGTON:** \*Dugsiyada Dadweynaha waxay heleen Barnamij, kaasoo qado bilaash ah iyo qiimo jaban gaarsiyay in ka badan 8,000 oo arday.

**ALEXANDRIA:** \*93 guryo cusub oo la awoodi karo oo ku yaal St. James Plaza ee xaafada Beauregard ayaa heshay lacagaha dawlada dhexe

## Waa maxay Tirakoobka?



Tirakoobka Mareykanka waa sahan qaran oo lagu tiryinayo qofkasta hal mar meesha saxda ah ee uu Mareykanka kaga noolyahay, iyadoo aan loo eegin jinsiyadda ama muhaajirnimada. Dastuurka ayaa waajibay inuu tirakoobka dhaco 10-kii sanaba mar.

## Maxaan u daryelaa?



Qof kasta oo Virginia degan oo aan la tirin, gobolka wuxuu weynayaa \$ 1,200 sanadkii - ilaa iyo 10 sano, ama \$ 12,000 wadarta lacagta federaalka ee loogu talagalay barnamijyada sida waxbarashada, isbitaalada, wadooyinka, iyo mashaariicda kale ee howlaha guud. Xogta tirakoobka ayaa sidoo kale go'aamineysa inta ergo ee gobolka ay ku leeyihiin Kongareeska si ay noogu doodaan.

## Xogta Tirakoobka Mareykanka ma sirbaa?



Sida ku xusan sharciga federaalka ee hadda jira (cinwaanka 13), xafiiska tirakoobka lama wadaagi karo dadweynaha ama hay'adaha kale ee dawlaadha dhexe jawaabaha tirakoobka ee tilmaamaysa shaqsiyaadka, sidoo kale kuwa laamaha socdaalka iyo sharci fulinta.

## Macluumaad nooceee ah ayaa Tirakoobka Mareykanka uu aruuriyaa?



Xogta gaarka ah ee la soo aruuriyay waxaa ka mid ah da'da, jinsiga, xaaladda guurka, tirada qoyska, ka-qeybgalka shaqaalaha, goobta shaqada iyo waxbarashada, goobta dhalashada, meeshii aad horay u daganeyd. Tirakoobka celcelis ahaan waxuu qaataa 10 daqiyo in la dhammaystiro.

## Goorma iyo sidee baan u qataa?



Maalinta Tirakoobka ayaa noqon doonta 1-da Abril, 2020. Markaad buuxineyo tirakoobka, waxaaq doontaa halka aad ku nooshayah taariikhdan. Ka hor Abril 1, qoys walba waxaa la siin doonaa casuumad si ay uga qeyqbataan tirakoobka. Waaqaa haysandoontaa saddex ikhtiyaar oo aad kaga jawaabto: khadka tooska ah, taleefoon ama emayl.

## Miyaan ka jawaabi karaa Tirakoobka luqadaha aan Ingiriisiiga ahayn?



In kasta oo foomamka waraaqaha lagu heli karo oo keliya Ingiriis iyo Isbaanish, waxaaq kaga jawaabi kartaa khadka tooska ah 12 luqadood, oo ay ku jiraan Isbaanish, Carabi, Shiiine, Faransiis, Haitian Creole, Jabaan, Kuuriyaan, Polish, Boortaqiis, Ruush, Tagalog iyo Fiyatnaamiis iyo taleefanka 59 luqadood ah. Waxaa sidoo kale jiri doona adeega nooc laga oo laga heli karo, sida farta indhoohala, iyo fiidiyow Luqada Dhagoola ee nooceeda Mareykanka ah.



## NOQO XUBIN KA MID AH

Nagala soo qaybal si aan ugu doodno oo aan uga wada hadalno muhiimadda ay leedahay dhammaystirka tirakoobka Abril 1, 2020.

#CountDMVIn #ShapeYourFuture  
 #CountTheRegion #VACCompleteCount  
[jenee.padmore@cfnova.org](mailto:jenee.padmore@cfnova.org) | 703-865-5002  
[www.cfnova.org/count-the-region](http://www.cfnova.org/count-the-region)